



## Dugsiga Sare ee Cleveland

3400 SE 26<sup>th</sup> Ave | Portland, OR 97202 | (503) 916-5120 | [www.pps.net/schools/cleveland](http://www.pps.net/schools/cleveland)

**Dugsiga Sare ee Grover Cleveland waa mid ka mid ah sagaalka dugsiyada sare ee dowladda ee ku yaala Portland, Oregon ee u adeega qiyaastii 1650 arday oo ku nool bartamaha xaafadda koonfurta-bari ee Portland. Isaga oo hada leh is-qorista labaad ee ugu badan dugsiyada sare ee magaalada, Cleveland wuxuu bixiyaa shaqada koorsada tacliimeed oo badan oo kala duwan ee guud ahaan manhajka.**

Marka lagu daro fursadaha badan ee ka jira fagaaraha tacliimeed, Cleveland waxay ku faraxsan tahay barnaamijkeeda abaalmarin mutaysatay ee bandhiga farshaxanka.

Fasallada waxaa lagu qabtaa dhismaha taariikhiga ee saddexda dabaq ka kooban, oo ku yaalla Koonfurta-bari ee Powell Boulevard ee u dhaxaysa Jidodka 26<sup>th</sup> iyo 28<sup>th</sup>, isaga oo Garoonka ciyaaraha uu dugsigu ee dib loo cusoobeysiyyay, uu yahay garoon caws ah iyo meelaha lagu ordo oo loogu talagalay dhammaan cimilida kala duwan, oo ku yaala meel u dhow.

Helitaanka iyo ku guuleysiga ee shaqada koorsada ku haboon, ayaa la tilmaamay, taasi oo ay ka mid yihiin barnaamijyo khaas ah oo taageero oo loogu talagalay Bartayaasha Luqadda Ingiriiska, ardayda uu maqalka ku adag yahay, iyo kuwa leh barnaamijka Qorshayaasha Waxbarasho ee Shakhsii ah (Individual Education Plans - IEP) oo loo qoondeeyay.

Isaga oo ah dugsi sare oo dhammeystiran oo afar-sano ah, Cleveland wuxuu caan ku yahay heerarka tacliinta sare ee maaddooyinka oo dhan, fursadaha badan ee dhanka farshaxanka, iyo jawi dugsi oo kalgacal iyo soo dhaweyn leh.

### Waxyaalaha ugu Muhiimsan ee Manhajka

- Shaqada koorsoo ee Shahaadada Caalamiga ah ee leh fursada lagu helo shahaadada IB. Barnaamijka adag ayaa dhiirigeliya ardayda adduunka oo dhan si ay u noqdaan dad firfircoo, naxariis badan iyo wax-bartayaal nolosha oo dhan ee caawiya abuurista adduun wanaagsan iyada la isticmaalayo fahamka dhaqamada kala duwan iyo ixtiraamka. Arday walba oo dhigta sanadka saddexaad waxaa lagu qoraa IB Ingiriisiga
- Koorsootinka Xirfadaha Farsamada Waxbarashada (Career Technical Education - CTE) ee nijeenimada/dhismaha, cilmiiga kambiyuutarka, farshaxanka wax karinta, soo saarka warbaahinta dhijitalka iyo ganacsiga.
- Barnaamijyada bandhiga farshaxanka/fanka iyo muuqaalka
- Afar Luqadood oo Caalami ah - Chinese, French, German iyo Isbaanish, dhammaan ah laga soo bilaabo bilowga ilaa laga gaarayo heerka IB.
- Dugsiyada fasalka 9-aad: ardayda cusub ayaa ku wareega dugsiga sare ee Dugsiyada yaryar ee leh koox isku mid ah oo arday ah oo leh saddex macallin oo isku mid ah oo loogu talagalay saddex fasal oo muhiim ah. Ardaydu waxay helayaan faa'iidada ah in ay lahaadaan la taliye isku mid ah ee dhammaan afarta sano ee dugsiga sare.
- Bixinta koorsoo badan oo la doorto oo ka kooban laga bilaabo bandhiga farshaxanka/fanka ilaa iyo hadalka iyo doodda iyo jimicsiga jirka 'CrossFit' iyo Daraasadaha Maskaxda lagu hayo iyo qaar kale oo badan.

**Hawsha:** Dugsiga Sare ee Cleveland wuu bixiyaa fursado ay ardaydu u arkaan in ay khusayso, la heli karo oo tartan leh. Waxaynu dhiirigelinaa muwaadiniinta firfircoon, mas'uulka ah anaga oo bixina bulsho uu qof kastaa ka mid yahay. Dhammaan ardayda waxay helan waxbarasho dhiirigelisa waxa ay xiisaynayaan.



### Xaqiiqooyinka Dugsi

**Naanaysta:** Warriors

**Midabyada Dugsiga:** Cagaarka jaalaha aad ka ah 'kelly green' & jaalaha liinta ah

**Dhaqanka u ah:** Qurxinta hoolka ku soo guryo noqoshada 'homecoming' iyo tartanka Abaalmarinta Jacaylka Dugsiga loo qabo 'Spirit Award'; isku imaanshaha dugsiga oo dhan oo kala duwan; riwaayadaha OneAct oo ay matalayaan ardayda dhigata sanadkii saddexaad; "Springtasia", dabaaldeg muusikada ah iyo bandhig farshaxan/faneed.





"Dugsiga Sare ee Cleveland, arday kastaa wuxuu heli karaa waxbarasho kobcin leh, tartan, iyo xiiso leh. Waxaan halkan ka la kulmay koritaan Aad u weyn oo si fiican iigu diyaariyey talaabadayda xigta."

— Molly Long, Fasalka 2018



## Cayaaraha iyo Hawlaha

- Dhammaan cayaaraha ay oggolaatay OSAA: baseball-ka, kubadda kolayga, dhiirigelinta kooxda, orodka dheer, qoob ka ciyaarka, kubadda cagta ee Maraykanka, golf-ka, kubbadda cagta, ciyaaraha barafka, softball-ka, dabaasha, tennis-ka, ciyaaraha fudud, kubada laliska iyo lagdinta.
- Barnaamijyada kooxaha muusikada, kooxaha heesaha, iyo hadalka iyo doodda ee abaalmarinta mutaystay.
- Barnaamijka riwaayadaha oo soo bandhiga shan ilaa lix bandhigyo sanad kasta
- Tababarka Maxkamadeynta, Qaabeynta/Jilida Qaramada Midoobay iyo kooxda dastuurka ee Anaga oo Dadka ah 'We the People' oo ay dhammaantood u tartama dhacdooyinka degaanka iyo gobolka
- In ka badan 55 naadi arday-oo-nidaamsan oo ka kooban laga soo bilaabo ururada ardayda (Aasiyanka, Latinx, Native, Polynesian), ilaa laga gaarayo awoodsiinta jinsiga iyo Isbahaysiga Dhanka Galmada & Jinsiga iyo Dhalinyarada u Dhaqdhqaqa Xuuquqda Xayawaanka ilaa Ardayda u doodda Fahamka Dhaqanka

## Adeegyada Ardayga

**Xarunta Shaqada & Kulliyadda-** Waxaa loogu talagalay in ay ugu adeegaan ardayda fasallada oo dhan ee qorshahooda dugsiga sare ka dib, Xarunta Shaqada & Kulliyada waxay furan tahay maalin kasta. Ardaydu waxay helaan talooyin ku saabsan xirfadaha, dugsiyada farsamada/xirfadaha, iyo kulliyadaha. Tabarucayaalsha CCC oo tababarhan ayaa caawiya taasi oo ay ardaydu iska timaado ama ay ballan sameysato.

**Xarunta Caafimaadka Dugsiga Ku-Salaysan-** Waxay bixisaa adeegyo dhammeystiran oo ay ka mid yihiin baarida iyo daaweynta dhaawacyada/cudurada;baaritaanka jireed ee cayaaraha la xiriira; arrimaha caafimaadka maskaxda; ka hortagga urka; iyo isku gudbinta dhakhtarka ilkaha iyo indhaha. Iyada oo ku taala gudaha CHS muddo 26 sano ah, Xarunta Caafimaadka, ee ay maalgelisay Degaanka Multnomah, waxay u adeegtaa qyaas ahaan boqolkiiba 75 ilaa 80 arday.

**Xarunta Adeegyada Ardayga-** Waxay hoy u tahay xafiisyada loogu talagalay la taliyayaasha tacliinta iyo shaqaalaha taageerada ardayga, oo ay ka mid yihiin shaqaalaha bulshada, dhakhtarka cilmi-nafsiga ee dugsiga, u dooddayaasha guusha ardayga, iyo isuduuhaha dib u soo celinta caddaaladda.

"Waxaynu nahay Dugsi Caalami ah oo Shahaadada Caalamiga ah bixiya oo ay ka go'an tahay taageerida arday kastaa in uu ka qalin jabiyo dugsiga sare isla markaana si guul leh u galu kulliyad iyo/ama xirfad. Waaanu nahay bulsho dugsi oo qiimeysa naxariista, sharafta, iyo deeq waxbarasho ee dhammaan isdhexgalkeena midba mid kale la yeelanayo. Waxaa naga go'an yaraynta farqiga u dhexeeyea guul gaarida dhanka isirkka anaga oo dhammaan ardaydeena ka qayb galinayna qarniga 21-aad, ee fikirka caalamiga ah, ee tacliin ahaan adag, iyo waxyaabaha dhaqan ahaan ku habboon ee barnaamijka waxbarasho ee afarta sano ah."

— Ayesha Freeman, Maamulaha